



Orientation to Ontario

DADKA NAAFADA AH

Qofka naafada ah ayaa u baahan taageerada nolol maalmeedka iyo helitaanka adeegyada.

Naafuoyinka waxaa ku jiri kara tan araga, maqalka, jidhka, hadalka ama luuqada, dhimirka, waxbarashada, garaadka ama kobaca iyo bii'ada.

Xog ka ogoow xuquuqaha dadka naafada ah ee ku cad Xeerka Xuquuqaha Aadanaha ee Ontario oo aad ka helayso barta Gudiga Xuquuqaha Aadanaha ee Ontario ohrc.on.ca ama findlink.at/accssibact

HEERARKA GELITAANKA

Sharciga Helitaanka Adeegyada ee Dadka Ontario ee Naafada ah (AODA) 2005, ayaa dejinaaya heerar lagu xaqijinaayo in dadka naafada ah ay ka qaybgeli karaan si buuxda bulshada Ontario. Dhammaan ganacsiyada iyo ururada ka shaqeeya Ontario waa inay buuxiyaan heerarka helitaanka ee goobaha adeegga macaamiisha, shaqada, xogta iyo xiriirka, gaadiidka iyo goobaha dadwaynaha.

- Xog badan ka ogoow heerarka AODA ontario.ca ama findlink.at/accssibact
- Xog badan ka ogoow Heerarka Gelitaanka oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/accsstandr

Si aad u hesho xog ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada dadka naafada ah, wac 211 ama booqo Disability Doorway oo aad ka helayso disabilitydoorway.com

BARNAAMIJYADA TAAGEERADA NAAFADA EE ONTARIO (ODSP)

Barnaamijka taageerada Naafada ee Ontario ayaa caawiya dadka naafada ah ee qaba baahida dhaqaalaha iyo/ama raadinaaya shaqada.

Xog badan ka eeg ontario.ca ama findlink.at/ont-dsp

DARYEELKA BULSHADA

Xarunta Helitaanka Daryeelka Bulshada (CCAC) waxay isku xidhaa adeegyada dadka naafada ah si looga caawiyo inay si madax banaan ugu dhex noolaadaan bulshooyinkooda. Shaqaalaha CCAC ayaa ku siinaaya taageero iyo xog ku aadan daryeelka caafimaadka, barnaamijyada maalintii, guryaha la taageero iyo xarumaha daryeelka muddada dheer. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo ontario.ca ama findlink.at/ccac-loc

TAAGEEROOYINKA DAWLADA

Waxaa jira barnaamijyo badan oo dawladeed oo ay heli karaan dadka waawayn iyo carruurta naafada ah. Barnaamijyadaan waxaa ku jira koontooyinka diiwaan gashan ee kaydada, canshuur celinnada iyo noocyada kale ee caawimaada dhaqaalaha. Si aad u hesho xog ku saabsan barnaamijyada taageerada naafada booqo canadabenefits.gc.ca ama findlink.at/CanBenefit

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>

MA OTAHAY?

Hal kamid ah todobadii qof oo ku dhaqan Ontario ayaa nooc naafo ah.

Funded by / Financé par